

BARNAAMIJKA DOORASHADA DEGMADA: HELSINKI 24/7

1. GURI IYO MAGAALO-MADAXDA

2. XASILAN OO CASRIYOOBAYSA

3. DIIRRAN OO DARYEEL LEH

1. GURI IYO MAGAALO-MADAXDA

Waxaan dhisaynaa Helsinki ay suurragal tahay in lagu deganaado qiimo macquul ah qof kastana uu guri ku leeyahay. Magaaladeennu waxay boos u haysaa dadka halkan ku dhashay iyo kuwa u soo guuray. Wuxaan doonaynaa in aan xoojinNo kaalinta caalaminnimo ee magaalada Helsinki.

Gaadiidka dadweynaha ee Helsinki waa in uu noqdaa mid la aaminI karo oo raqiis ah. Waa in uu magaalada oo dhan ka shaqeeyaa afar iyo labaatanka saac. Waxaan dhisaynaa Helsinki ay ku socoshadeedu tahay mid fican, ammaan ah oo hufan, haddii lagu lugaynayo, baaskiil lagu wadayo ama baabuur lagu kaxaysanayo.

Helsinki waxay ka koobantahay xaafado leh waxyaabo u gaar ah oo xayi ah. Waxaan dhisaynaa Helsinki aqoonsiga iyo dhaqanka xaafadaheedu ay yihii qaninnimo iyo awood. Dhammaan deegaannada magaaladeennu waa ay barbwaqaqoobi karaan.

Meel kasta oo Helsinki ku taal waa in ay noqotaa meel la dego laguna noolaado oo ammaan ah. Waxaan dhisaynaa ammaanka annagoo wajahayna islamarkaasna xallinayna sababaha ammaan darrada keena, mana dhisayno derbiyo.

Helsinki waxay abuurysaa fursado boqolaal kun oo shaqo ah. Waxaan dhisaynaa Helsinki ku fiican in lagu shaqeeyo, ganacsado islamarkaasna lagu shaqaaloobo. Waxaan sidoo kale doonaynaa, in magaaladeennu ay shaqo-bixiye ahaan noqoto tusaale, daacad iyo xil-qaad leh iyo in shaqaalaheedu ay shaqadoodu ugu faanaan in ay tahay wax wanaagsan oo la wada leeyahay.

2. XASILAN OO CASRIYOOBAYSA

Isbeddelka cimilado waa arrinka kama dambaysta ah ee bani'aadanka. Waxaan dhisaynaa Helsinki samaynaysa doorashooyin bey'adda ogaal u leh, taas oo ku dadaalaysaa ka

shaqaysiinta dib u isticmaalidda. Istimaaalka shidaalka dhulka laga qodo waa in la joojiyaa waana in fiiro gaar ah loo yeeshaa soosaarista kul iyo tamar bey'ada u roon.

Helsinki waa magaalo waxbarasho oo ardayda soo jiidata, halkaas oo uu qof kasta xaq u leeyahay aqoon iyo waxbarasho. Wuxaan dhisaynaa Helsinki oo barbaarin-horaadka iyo dugsiga hoose-dhexe laga helo guriga agtiisa. Wuxaan waxbarashada heerka labaad oo lacag la'aan ah iyo taageerada dugsiyada tacliinta saree ee Helsinki qof kasta ugu dammaanad-qaadaynaa waddo waxbarasho oo noocyoo badan.

Wuxaan dhisaynaa Helsinki horseed ka ah laqabsashada. Wuxaan qof kasta oo shaqo, waxbarasho, megangelyo ama xittaa jacayl dartiis halkan ugu soo guuray ka dhigaynaa xubin si buuxda bulshadeenna uga mid ah.

Nololwanaagga Helsinki iyo reer Helsinki wuxuu ku tiirsanyahay meheradda shaqada, ganacsiga iyo hindisooyinka cusub. Wuxaan leenahay xoogga shaqo ee ugu aqoonta iyo waxbarashada badan dalka oo dhan iyo adeeg-isticmaalayaan nus malyan ka badan. Wuxaan dhisaynaa Helsinki ay suurragaltahay in wax cusub lagu hal abuuro, lagu ganacsado dadkana lagu shaqaaleeysiyo. Wuxaan suurragelinaynaa hawl shirkadeed cusub oo leh xal ku salaysan siyaasadda xafiisyada iyo gaadiidka.

3. DIIRRAN OO DARYEEL LEH

Wuxaan dhisaynaa Helsinki ay adeegyadeeda dadweynaha helayaan dadka oo dhan, adeegga xannibaad la'aantuna uu ku hirgelayo marka goobta adeegga la joogo iyo marka qaab elektroonig ah loo bixinayo. Helsinkiideennu waa ay daryeeleysaa islamarkaasna dhegeysanaysaa qof kasta oo reer Helsinki ah.

Aqoonta daryeelka caafimaadka ee ugu fiican waa in dhammaan dadka u baahan ay magaalada oo dhan heli karaan. Wuxaan dhisaynaa Helsinki uu qof kasta fursad u helayo daryeel iyo xannaano fiican. Wuxaan dhisaynaa magaalo bixinaysaa fursad lagu helo nolol wanaagsan, waayeelnimo firfircooni iyo sharaf leh. Helsinki waxaa lagu arkayaa qaybaha nolosha oo dhan. Mararka qaar waxaa aad loogu baahanyahay shabakadda caawimaadda ee bulshada.

Wuxaan dhisaynaa magaalo dadka u diir-naxada kuna dadaashaa, iyo magaalo xal u raadisa takoormidda iyo dan yarida bulshada. Wuxaan dhisaynaa Helsinki ku dadaalaysa nololwanaagga dhallinyarada islamarkaasna gaaraysa kuwa kaalmada u baahan. Cunug kasta iyo da'yar kasta waxay Helsinki ku helayaan fursad iskumid ah oo ay hiwaayad ku samayn karaan.

Helsinki waa magaalada dhaqanka ee Finland. Dhaqanku wuxuu maalin kasta soo saaraa nololwanaag, saamayntiisuna meelo fog ayeey gaartaa. Wuxaan dhisaynaa Helsinki dhaqanka looga taageero siyaabo badan hawl Wadeennadeedana la daryeelo marka ay xaalad adag timaado. Waa in lagu dadaalaa shabakadda maktabadaha ee sida dhabta ah ugu adeegta magaalada iyo reer Helsinki oo dhan.

Kaymaha, xeebaha iyo jasiiradaha Helsinki waa kuwa wax lala meel dhigaa aanay jirin. Suuqyda, barxadaha, jardiinooyinka iyo beeraha nasashada ee yaryar waxay lagama

maarmaan u yihiin bey'ada magaalada. Wuxaan dhisaynaa Helsinki marka ay fidayso la hubinayo, in dhul uu u haro dhabbayaasha ruclaynta iyo goobaha baashaalka.